HWDSB

HUMAN EARLY LEARNING PARTNERSHIP

MDi MIDDLE YEARS DEVELOPMENT INSTRUMENT

Juun 2021

Waalidiinta iyo Mas'uuliyiinta Qaaliga ahoow:

Waxaanu xusnay intii lagu jiray wargalinta Tirakoobka Ardayda ee gu'ga in aan raaci doono Tirakoobka sahanka yaga badqabka, Aaladda Koritaanka Sanadaha Dhexe (Middle Years Development Instrument (MDI), si aan si toos ah uga war helno carruurta iyo dhallinyarada dhigata fasalada 4 aad illaa 12 aad ee ku saabsan khibradahooda iyo badqabkooda inta lagu jiro COVID-19.

Badalkii loo qori lahaa MDI inta lagu jiro wakhtiga xiisadaha, waxaanu ku siinaynaa lifaaqa sahanka si aad u siiso canuggaaga ama caruurtaada dhigata fasalada 4aad ilaa 12aad haddii aad aqbasho in ay ka qaybqaataan:

Lifaaqa MDI ee Fasalada 4-12: https://ca.research.net/r/MDIgr4-12

Caqabadaha iyo hubanti la'aanta kajirta dugsiyada wakhti xaadirkaan ayaa naga horistaagaaya in aan billowno MDI si ay u noqoto talaabada qorshe sanadeedka Guddiga yaga. Waxaanu si toos ah uga hirgalin doonaa MDI fasalada dhexdooda inta lagu jiro sanad dugsiyeedka soo socda.

Waxaanu ognahay in sanadkaanu ku adkaa carruur iyo dhalinyaro badan. Taasi waa sababta ay muhiimka noogu tahay in aan aruurino xog si aan si buuxda ugu fahamno saameynta safmarka uu ku leeyahay badqabkooda iyo fahamkooda. Waxaanu rabnaa in aan MDI u isticmaalno in aan ku cabirno badqabka inta lagu jiro wakhtigaan muhiimka ah ee taariikhiga ah. Waxaanu natiijooyinka MDI u isticmaali doonaa in aan ku wargalino barnaamijyada, kaalmooyinka iyo adeegyada loogu tala galay carruurta iyo dhallinyarada kuwaas oo sare u qaadaya koritaanka caafimaadka qabka leh iyo ka bogsashada safmarka COVID-19.

MDI waa aalad la tijaabiyay si loogu cabiro badqabka, waxaanu aaminsannahay in ay tahay qalabka saxda ah ee hadda la isticmaalayo. MDI waxaa sameeyay cilmibaareyaal ku suganHuman Early Learning Partnership (HELP, Iskaashatada Bini'aadamka ee Waxbarashada Dhallaanka) oo jooga University of British Columbia (UBC) loogu tala galay carruurta dhigata fasalada 4-8 Waxaanu la shaqaynay UBC si aan ugu isticmaalno dhallinyarada dhigata fasalada 9-12. Sahanku wuxuu caruurta weydiinayaa iyo dhalinyarada waxyaabo ku saabsan fikirkooda, dareenkooda iyo khibraddooda dugsiga dhexdiisa iyo bulshada dhexdeeda ee waxyaabaha soo socda:

1. Koritaanka dareenka iyo midka bulsho, sida is qiimaynta, niyad samaanta, farxadda iyo beerjileeca;
2. Dareenka ku xirnaanshaha dugsiga, qoyska, saaxiibada, iyo bulshada;
3. Khibaradaha dugsiga;
4. Caafimaadka jirka iyo badqabka; iyo
5. Isticmaalka wakhtiga xiisadaha ka danbeeya, iyo sidaa si lamid ah rajooyinka ardayga ee markuu dugsiga dhameeyo kaddib.

Si aad u hesho faahfaahin buuxda oo ah noocyada su'aalaha mid kasta oo kamid ah qaybaha mowduucaan, fadlan eeg: www.hwdsb.on.ca/elementary/supports/mental-health-and-well-being/mdi/

HWDSB

HUMAN EARLY LEARNING PARTNERSHIP

MDI MIDDLE YEARS DEVELOPMENT INSTRUMENT

Inkasta oo aan doonayno in aan si toos ah uga warhelno caruurta iyo dhallinyarada, haddii aad aaminsantahay in canuggaagu u baahan yahay taageero si uu u buuxiyo MDI, fadlan u caawi sida aad is leedahay way ku habboon tahay.

Jawaabaha canuggaaga ee su'aalaha waxaa laga dhigi doonaa kuwo qarsoonwaxaana loo soo bandhigi doonaa qaab qarsoodi ah. Ma aruurinayno waxyaabaha ardayga tilmaamaya (sida, magaca ama lambarka ardayga). Kaliya shaqaalaha Waaxda Cilmi baarista iyo Qiimaynta ayaa heli doona xogta sahanka waxaana laga samayn doonaa warbixino gunaanad ah, oo qarsoon oo loogu talagalay dugsideena, Guddiga, iyo saaxiibada bulshada si sare loogu qaado nolosha caruurta iyo dhalinyarada. Caruurta iyo dhalinyaraduba waa ay ka boodi karaan su'aalo kasta aysan jeclayn in ay ka jawaabaan. MDI waxaa kujira macluumaad ku saabsan cidda ay la xiriiri karaan haddii ay dareemaan qalqal ayna u baahdaan qof ay la hadlaan.

Wixii su'aalo ama tabashooyin ah oo la xariira sirta xogta canuggaaga, fadlan la xiriirprivacy@hwdsb.on.ca. Wixii su'aalo ah oo ku saabsan isla sahanka, fadlan la xiriirresearch@hwdsb.on.ca. Haddii aad ka welwelsan tahay caafimaadka maskaxda canuggaaga iyo badqabkiisa, waxaad ka raadsataa bogga ilaha ee halkaan kujira: www.hwdsb.on.ca/elementary/supports/mental-health-and-well-being/mdi/

Waad ku mahadsan tahay in aad ka fikirto in aad u oggolaato ardaygaaga in uu ka qaybqaato sahankaan inta lagu jiro wakhtigaan gaarka ah. Fadlan u dir lifaaqa ku habboon haddii aad aqbashay in ay ka qaybqaataan.

Kooxda MDI-da